



Adeegyada Daryeelka Degaanka (RCS)

Guriga Qoyska Qaangaarka (AFH) • Xarunta Lagu Daryeelo Waayeelka iyo Naafada (ALF) • Xarumaha Adeegyada La Horumariyey (ESF)

**Ogeysiiska Wareejinta ama Ka-Saarid**  
Notice of Transfer or Discharge

Foomkan waxaa loo isticmaali karaa in lagu buuxiyo shuruudaha ogeysiiska wareejinta ama ka-saaridda ee ay u bilaabeen AFH, ALF, ama ESF si waafaqsan RCW [70.129.110](#) iyo WACS [388-76-10616](#), [388-76-10617](#), [388-78A-2660](#), [388-78A-2661](#), [388-107-0280](#), iyo [388-107-0281](#). Taariikhda uu ogeysiiskan dhaqangalayo waa in ay ahaataa ugu yaraan 30 maalmood laga bilaabo taariikhda la bixiyay ogeysiiska, haddii aanu jirin ka-reebis khuseeya oo waafaqsan RCW [70.129.110](#)(4).

Ogeysiiska:  Wareejinta  Ka-saaridda

Magaca Degganaha	Magaca AFH / ALF / ESF
Ogeysiiskan waxaa loogu talagalay in uu kugu wargeliyo in AFH / ALF / ESF ay ku tala jiraan in ay meel kale kuu wareejiyaan ama ay goobta kaa saaraan. Haddii aadan fahmin foomkan, weydii xarunta ama qaraabo ama saaxiib in uu kuu sharxo. Fadlan akhri macluumaadka ku hoos qoran "Xuquuqaahaaga iyo Kheyraadyada" ee bogga labaad.	
Cinwaanka AFH / ALF / ESF ee laga wareejinayo ama laga saarayo:	Taariikhda Dhaqangalka Wareejinta
Goobta Loo Wareejinayo: Magaca iyo Cinwaanka	Loo wareejinayo: Taleefoonka
<p><b>Sababta(-aha) wareejinta ama ka-saaridda</b> (haddii loo baahdo, ku soo lifaaq xaashi gaar ah si aad ugu darto macluumaad dheeraad ah):</p> <input type="checkbox"/> Wareejinta ama ka-saaridda waxaa loogu baahan yahay daryeelka degganaha, baahiyaha degganahana laguma haqabtiri karo xarunta. <input type="checkbox"/> Bedqabka shakhsiyaadka ku sugan xarunta ayaa halis ku jira. <input type="checkbox"/> Caafimaadka shakhsiyaadka ku sugan xarunta ayaa haddii kale halis geli kara. <input type="checkbox"/> Degganuhu wuxuu ku guuldarreystay in uu bixiyo lacagtii looga baahnaa joogitaankiisa. <input type="checkbox"/> Xaruntu waxay joojinaysaa in ay hawlahaada sii wadato. <p>Sharaxaad kooban oo taageeraysa tallaabada wareejinta ama ka-saaridda:</p>	
<b>Ogeysiiska waxaa bixiyay:</b>	<b>Ogeysiiska waxaa helay (ikhtiyaari):</b>
Magaca Bixiyaha / Maamulaha	Taariikhda
Saxiixa Degganaha / Wakiilka	Taariikhda

**Faafinta Ogeysiiska**

Xarunta waa in ay nuqulka ogeysiiskan siisaa degganaha iyo wakiilka degganaha, haddii degganuhu uu mid leeyahay.

Degganayaasha haysta Medicaid, xarunta waa in ay sidoo kale ku siisaa nuqulka ogeysiiska saddex maalmood oo kuwa kaalandarka gudahooda.

- Barnaamijka Baarista Cabashooyinka Daryeelka Muddada-Dheer: email: [Discharges@mschelps.org](mailto:Discharges@mschelps.org) ama e-fakis (253) 216-3699
- Maareeyaha kiiska DSHS

**Akhri macluumaadka hoose ee loogu talagalay xuquuqaha iyo kheyraadyada muhiimka ah.**

**Xuquuqahaaga iyo Kheyraadyadaada: Dhammaan Degganayaasha**

Shaqaalaha baara Cabashooyinka ee gobolka Washington:

Si aad u hesho caawimaadda iyo macluumaadka ku saabsan ogeysiiskan fadlan kala xiriir shaqaalaha baara cabashooyinka daryeelka muddada dheer lambarkan bilaashka lagu waco 1-800-562-6028 ama emailkan [ltcop@mschelps.org](mailto:ltcop@mschelps.org). Barnaamijka Baarista Cabashooyinka Daryeelka Muddada-Dheer ee Washington wuxuu ku yaallaa 1200 S. 336<sup>th</sup> Street Federal Way, WA 98003. Waxaad ka heli kartaa shakhsiga baara cabashooyinka degaankaaga adiga oo u marayo mareegtada barnaamijkooda: [www.waombudsman.org](http://www.waombudsman.org), hoosta "Hel Shakhsiga Baara Caashooyinka / Find an Ombuds".

Xuquuqaha naafonimada Washington:

Haddii lagaa helay xanuun dhimirka ah ama naafonimo caqliga ah, waxaad la xiriiri karaa kooxda xuquuqaha naafonimada Washington 1-800-562-2702 ama (206) 324-1521. Waxaad sidoo kale codsigaaga oo qoraal ah ku soo gudbin kartaa fakiskan (206) 957-0729, email-kan [info@dr-wa.org](mailto:info@dr-wa.org) ama boostadan Disability Rights Washington, 315 5th Ave S, Suite 850, Seattle WA, 98104.

Maamulka Nololsha Bulshada iyo Guriga ee DSHS (HCLA):

Waxaad xaq u leedahay in aad cabasho ugu gudbiso unugga xallinta cabashooyinka (CRU) lambarkan 1-800-562-6078 ama bartan internetka <https://www.dshs.wa.gov/altsa/home-and-community-services/report-concerns-involving-vulnerable-adults>.

**Ogeysiiskan soo socda wuxuu kaliya ku dabaqmaa degganayaasha daryeelkooda laga bixiyo Medicaid:**

**Degganayaasha leh Medicaid KALIYA**

Talo sharci:

Haddii aad qaadato Medicaid, waxaad xaq u leedahay qareen bilaash ah si uu kaaga caawiyo in aad ka jawaabto ogeysiiska wareejinta ama ka-saaridda. Haddii aad doonayso qareen si bilaash ah kuugu shaqeeyo oo ku caawiyo, fadlan ka wac khadka baaritaanka difaaca ka-saaridda daryeelka muddada-dheer 888-437-0017. Fadlan ogow in xaqa qareenka loo leeyahay ay ku xiran tahay helitaanka maaliyad.

Maareeyaha kiiska DSHS:

Waxaad kala xiriiri kartaa maareeyaha kiiskaaga DSHS su'aalaha ku saabsan ogeysiiskan ama si aad wax uga oogaato ikhtiyaarada kale ee nololsha. Maareeyaha kiiskaaga DSHS waa:

Magaca Maareeyaha Kiiska DSHS

Macluumaadka Xiriirka Maareeyaha Kiiska DSHS (telefoonka iyo email-ka)